IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH
# الجريدة الرسمية

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 3aad | Mogadiscio 1 Agosto 1975 | L.8

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA  جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilahmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 45, Tr. 10 Junyo 1975, — *Toosin ku saabsan Sharciga Rugta Ganacsiga* Bog. 564

SHARCI L. 46, Tr. 19 Junyo 1975, — *Axdigii ku saabsanaa ACP-EEC* » 567

SHARCI L. 46 Tr. 19 Junyo 1975, — *Instrument of Retification* » 568

SHARCI L. 47, Tr. 29 Junyo 1975, — *Ogoolaansho Heshiis Amaah ah oo dhexmaray J.D.S. iyo Jamhuuriyadda Carabta ee Libiya* » 569

SHARCI L. 47, Tr. 29 Junyo 1975, — *Nuqul Carabi ah.* » 570

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA Tr. 17 Juny o1975, L. 105 — *Dallacaad* Bog. 571

Madbacada Dawladda — Muqdisho

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA Tr. 28 Junyo 1975, L. 106 — *Dallacaan* » 572

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA Tr. 16 Lulyo 1975, L. 107 — *Magacaabid Kuxigeen Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Badbaadada Dalka* » 573

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA Tr. 24 Junyo 1975, L. 108 — *Magacaabid Guddoomiyayaal Degmo.* » 574

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD Tr. 27 Maajo 1975, L. 109 — *Dhul Dowladeed la siiyey gacatana loo geliyey Jaalle Xasan Nuur Cilmi* » 575

## BOGGA SEDDEXAAD

### TALOOYIN, ISGAASIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA Tr. 26 Luuliyo 1975, — *Jeegga Wareega L. 26579, So. Sh. 9.000,00 ee lumay ee u leeyahay Cabdillaahi Geedi Roob-le (113)* 577

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA Tr. 15 Luuliyo 1975 — *Lumid Jeegga Wareegga ee lamb. 5429 Shs. 1.000/= ay leedahy Xalwo Cabdi Qabille (113) Bis* » 578

# BOGGA KOWAAD

## SHARCI

**SHARCI L. 45 Tr. 10 Luuliyo 1975,**
**Toosin ku saabsan Sharciga Rugta Ganacsiga.**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka;
ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 38 ee soo baxay 30.7.1970 ee ku saabsan Rugta Ganacsiga.
ISAGOO AQOONSAN Iney tahey lagama maarmaan in wax lagu kordhiyo Sharciga lambarkiisu yahay 38 ee soo baxay 30.7.1970.
ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga hoos ku qoran:

Qodobka 1aad

Toosin Sharciga Rugta Ganacsiga

Waxaa la toosinayaa sharciga lambarkiisu yahay 38 ee soo baxay 30.7.70 ee ku saabsan Rugta Ganacsiga, waxaana lagu kordhinayaa qodobada soo socda:

Qodobka 2aad

LA Wareegidda Wakiilnimada Ganasciga Dibedda

1. Marka laga bilaabo taariikhda uu dhaqan galo sharcigan, Dawladda Soomaaliyeed ayaa la wareegeysa maamulka shaqada wakiilnimada ganacsiga dibedda (Commercial Agencies).
2. Hawshaas waxaalaga xilsaarayaa wax ka mid ah Rugta Ganacsiga (Chamber of Commerce).
3. Dadkii horey u haystay shatiyada (licences) ku saabsan Wakiilnimada ganacsiga dibedda waa laga qaadayaa.

Qodobka 3aad

Shaqada Waaxda

Guud ahaan Shaqada Waaxda waxay tahay inay maamusho iyo iney iskudubariddo hawsha ku saabsan wakiilnimada ganacsiga lala yeesho dibedda, gaar ahaan waxaa loo xilsaaray:

1. Inay qabato hawshii ey qaban jireen wakiiliinta ganacsiga dibedda (Commercial Agencies).
2. Iney xiriix la yeelato sharikadaha dibedda si ey ula socoto sicirka suuqyada Adduunka

3. Iney Wasaaradaha iyo Wakaaladaha madax - bannaan iyo Hey'adaha Dawladda oo dhan la socodsiiso sicirka Adduunka, una keento, markii loo baahdo, waxyaabaha la doonayo in laga heli karin Waddanka gudihiisa.

4. Iney ilaaliso in wax allaale wixii ay soo gadanayaan Wasaaradaha, Wakaaladaha iyo Hay'adaha kor ku tilmaaman, inuu noqdo sicirka ugu wanaagsan ee adduunka laga heli karo.

5. Iney xiriir la yeelato Wakiilada Ganacsiga ee Safaaradaha Soomaaliyeed.

6. Hawl kasta oo xiriir la leh kuwa kor lagu tilmaamay.

### Qodobka 4aad
### Dhismaha Waaxda

1. Waaxda waxaa madax u noqonaya Agaasime, waxaana magacaabi doona Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka isagoo tixgelinaya talada Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Ganacsiga.

2. Waaxda waxay ka koobnaaneysaa madax xubin (Head of Service) iyo madaxda laamaha (Heads of Sections) iyo Shaqaale kale.

3. Waaxda waxay ku yeelan kartaa wakiilo Waddanka gudihiisa iyo dibedddaba si ey u fuliso hawleheeda.

### Qodobka 5aad
### Awoodda Waaxda

1. Waaxda waxay lahaaneysaa awood ay ku fuliso hawleheeda iyadoo mar kasta dhawreysa kuna dhaqmeysa sharcigan iyo sharciga lambar 38 ee soo baxay 30.7.70.

2. Waaxda waxaa awood loo siineyaa inay ka qaadato Khidmad lacageed (Commission fee) hawlaha wakiinimada ganacsiga dibedda ee ay qabato.

### Qodobka 6aad
### *Xeer gaar ah (Tnternal Regulations)*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Ganacsiga wuxuu awood u leeyahay isagoo tixgelinaya talada Agaasimaha Guud ee Rugta Ganacsiga inuu guddomiyo Xeer gaar ah (internal Regulations) oo ku saabsan khidmada iyo wixii kharaj ah ee kale oo la xiriira hawlaha ay waaxdu qabato (Commission fee ect).

### Qodobka 7aad
### Tirtir

Sharci kasta oo ka soo hor jeeda ama aan la socon karin sharcigan waa la tirtiray.

Qodobka 8aad

Dhaqan gelin

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka, waxaana lagu soo saari doona Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Muqdisho, 10, Luliyo, 1975.

GUDDONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAAANKA
*( Juulle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre )*

---

**SHARCI L. 46 Tr. 19.6.75**

**Axdigii ku saabsanaa ACP - EEC.**

MARKUU ARKAY Xaashiida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar, 1969; iyo sharciga No.1;

MARKUU ARKAY ACP - EEC Axdigii Lome oo la saxiixay 28kii Febraayo, 1975;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aankii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha;

WUXUU SOO SAARAY

Sharciga soo socda;

Qodobka 1aad

Axdigii ku saabsanaa ACP - EEC oo ay Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaaliya saxiixday 28kii Febraayo, 1975 waa la oggolaaday.

Qodobka 2aad

Axdigaasi wuxuu yeelanayaa astaan sharci wuxuuna ka mid noqonayaa sharciga Dalka yaalla sida ku qoran qodobkiisa 87aad, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 19 - 6 - 75

*( Juulle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre )*
Madaxweynaha Golaha Sare ee kacaanka
Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka

SHARCI L.46 Tr. 19.6.75

**Instrument of Ratification**

## SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC
## THE PRESIDENT
## OF THE SUPREME REVOLUTIONARY COUNCIL

HAVING SEEN The First and Second Charters of the Revolution of 21st October 1969 ond Law No.1;

HAVING SEEN ACP - EEC Convention of Lome signed on 28th February 1975;

TAKING NOTE Of the approval of the Supremt Revolutionary Council and of the Secretaries of State.

Hereby promulgates the following law:-

ARTICLE I

The ACP - ECC Convention of Lome signed by the Government of the Somali Democratic Republic on 28th February, 1975 at Lome, is here by Ratified:-

ARTICLE II

This Convention shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic from the date of its entring into force in accordance with Article 87 of the Convention:-

This law shall come into force immediately and published in the Official Bulletin:-

Muqdisho. 19.6.75.

(Jaalle Major General Maxamed Siad Barre)
President of the Supreme Rivolutionary

**SHARCI L. 47 Tr. 17 Luuliyo 1975.**

**Oggolaansho Heshiis amaah ah oo dhexmaray Jamhuuriyadda Demoqradiga ee Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Carabta ee Libiya**

MARKUU ARKAY Xaashidii 1aad tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktobar 1969;

MARKUU ARKAY Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaalia iyo Libiya la saxiixay 26 Juniyo 1974.

ISAGOO AQOONSADAY Iney tahay danta labada dawladood ee walaalaha ah inuu dhexmaro heshiis dhaqaale iyo iskaashiba,

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aankii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda taariikhdu markey aheyd 19.6.75.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:-

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday meel - marinta Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Carabta ee Libiya oo ay kala saxiixdeen labada Dawladood, taariikhdu markey aheyd 26.6.1974, kuna saabsaneyd dhameystirka gegida Dayuuradaha Gaalamiga ah ee Kismaayo;

Heshiisku wuxuu yeelanayaa astaan sharci ah, wuxuuna ka mid noqonayaa sharciyada u yaalla Jamhuuriyadda Dimoqradiga ee Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha GSK, waxaanu lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho. 17.7.75.

*Jaalle S.G. Muxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

وثيقــة تصديــق

رئيس المجلس الاعلى للثورة

بعد الاطــلاع على ميثاق الاول والثانى للثورة ٢١ اكتوبر ١٩٦٩

بعد الاطــلاع على الاتفاقية بين الجمهورية الصومالية الديمقراطيــة والجمهورية العربية الليبية المبرمة فى ٢٦ يونيو ١٩٧٤ الخاصة باقراض الحكومة العربية الليبية ٢ مليون دينار ليبى الى جمهورية الصومل الديمقراطية وذلك لاتمام بناء مطار كسمايو الدولى .

واخذا بعين الاعتبار رغبة الدولتين الشقيقتين التعاون فى الميــــدان الاقتصادى .

وطبقــا لقرار مجلس قيادة الثورة والسكرتيرين بتاريخ ١٩ يونيو ١٩٧٥م .

يصدر القانون التالى

المــادة الاولى

لقد تم التصديق على الاتفاقية المبرمة بتاريخ ٢٦ يونيو ١٩٧٤ بــين جمهورية الصومال الديمقراطية والجمهورية العربية الليبية الخاصة بتقديم قرض ليبى للصومال قدره ٢ مليون دينار ليبى وذلك لاتمام بنـاء مطـــار كسمــايو الدولى .

وتكون للاتفاقية المذكورة قوةالقـانون فى جمهرية الصومال الديمقراطية وتعد من القوانين النافذة فى الصومال .

المــادة الثانية

يسرى مفعول هذا القانون حال مــا يمضى عليــه رئيس المجلس الاعلى للثورة ونشر فى الجريدة الرسمية للدولة .

مقديشو ٧٥ ــ ٧ ١٧م

**رئيس مجلس الاعلى للثورة جـاللى محمد سيـاد برى**

# BOGGA LABAAD

## XEER

**XEER MADAXTOOYADA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

**Tr.17 Juunyo 1975. L. 105.**
**Dallacaad.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 5aad (lambarka 4aad ee sharciga ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska laha soo saaray 23kii Disembar 1972, kuna lambarsan 2;

ASAGOO TIXGELIYEY Shaqadiisa wanaagsan, kuna darsaday hawlkarnimo iyo daacadnimo intaba (merito eccezionale);

ASAGOO ARKAY Warqaddii lambarkeedu ahayd XGM/GSK 13 - 472 taariikhdeeduna ahayd 15 Juunyo 1975 ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka kuna saabsaneyd in la dallacsiiyey Xiddigle Xaashi Maxamed Guuleed lana gaarsiiyey darajada Laba - Xiddigle;

ASAGOO DHEGEYSTAY Taladii uu soo jeediyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

In Xiddigle Xaashi Maxamed Guuleed ee ka tirsan Ciidanka Boliiska la dallacsiiyey lana gaarsiiyey darajada ah Laba - Xiddigle, marka laga bilaabo 15 Juunyo 1975, kuna hirgeleysa xagga sharciga iyo dhaqaalahaba.

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelaya, waxaana lagu dhigi doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 17.6.75.

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka
*(S.Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
*(S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib)*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Maaliyadda
*(Dott. Cabdiraxmaan Nuur Xirsi)*

Waan aragnay ee diiwaangelinnay
diiwaanka lam L.3 Boggaa lam.246
*G Dhexe Cabdullaahi Warsame Nuur.*

**XEER MADAXTOOYADA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

**Tr. 17 LUG. 1975. L. 106**
**Dallacaad.**

GUDDONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 5naad (lambarka 4aad ee sharciga ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska lama soo saaray 23kii disember 1972, kuna lambarsan 2;

ASAGOO TIXGELIYEY Shaqadiisa wanaagsan iyo muteysi awgeed (merito eccezionale);

ASAGOO ARKAY Warqadii taariikhdeedu ahayd 15 Juunyo 1975 kuna lambarsaneyd SEC/A/8/1. ee Taliyaha Ciidanka Boliiska ugaga soo xogwarramay Dhamme AXMED CABDULLE SHUCAYB ee ka mid ah Ciidanka Boliiska, asagoo soo jeediyey in loo dallacsiiyo darajada Gaashaanle;

ASAGOO DHEGEYSTAY Taladii Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, kuna qornayd warqadda lambarkeedu yahay A/C/1/4 - 423 ee 24 Juunyo 1975.

WUXUU XEERAY
Qodobka 1aad

In Dhamme AXMED CABDULLE SHUCAYB ee ka tirsan Ciidanka Boliiska
la dallacsiiyo lana gaarsiiyey darajada ah Gaashaanle, marka laga billaabo 1/7/1975, kuna hir geleysa xagga sharciga iyo dhaqaalaha.

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelaya, waxaana lagu dhigi doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 28/GIU. 1975

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka
*Sx. S.Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Maaliyadda
*Sx. Dott. Cabdiraxmaan Nuur Xirsi*

Waan aragnay ee diiwaangelinnay
diiwaanka lam. 3 bogga lam. 247
Muqdisho, 17 Lug. 1975
Hantidhawraha Guud
*Sx. Cabdullaahi Warsame Nuur G Dhexe*

**XEER MADAXTOOYADA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

**Tr 21 LUG. 1975 L.107**

**Magacaabid Kuxigeen Xeer Ilaaljyaha Guud Maxkamadda Badbaadada Dalka.**

## XEER

MARKUU ARKAY Warqadda koowaad iyo tan labaad ee Kacaankii 21kii Oktoobar 1969kii;

MARKUU ARKAY Xeerka tirsigiisu yahay 3soona baxay 10kii Jannaayo 1970kii;

MARKUU TALADA KU DARAY Iney tahay lagama maarmaan in la kordhiyo tirada kuxigeennada Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Badbaadada Dalka, Muqdisho, si'hawsha loo socodsiiyo;

MARKUU TIXGELIYEY Ra'yiga Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Badbaadada Dalka;

WUXUU GUDDOONSHEY

Marka laga bilaabo taariikhda Dekereetadaan, waxaa loo magacaabay, inuu noqdo «Kuxigeen» Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Markamadda Badbaadada Dalka, Muqdisho, Jaalle Gaashaanle YUUSUF CALI TAHAR oo ka tirsan Ciidanka Boliiska.

Dekereetadaanu waxay dhaqan geleysaa marka laga bilaabo taariikhda u qoran:-

Muqdisho, 16/7/1975

F/to: *(Jaalle S Gaas Maxamad Siyaad Barre)*
*MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE*
KACAANKA

**XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA**

**Tr. 24 GIU. 1975 L. 108**
**Magacaabid Guddoomiyeyaal Degmo:-**

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

ASAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ASAGOO ARKAY Qodobka 1aad (Xarafka L) iyo kan 10aad Lambarka 3aad ee Sharciga 52 lana soo saaray 8eedii Juun 1972kii;

ASAGOO OGAADAY Baahida loo qabo in loo magacaabo Guddoomiyeyal Degmooyinka: Kismaayo, Gaalkacyo, Qandala, Caluula, Marka, Garoowe, Ceel - Buur, iyo Waajid.

WUXUU GOOYEY

Qodobka 1aad

Saraakiisha hoos ku qoran, waxaa loo magacaabay iney noqdan Guddoomiyeyaal Degmooyinka kor lagu sheegay, iyadoo Sarkaal walba hortiisa lagu dhinac qoray Degmada uu ka noqonaayo Guddoomiye iyo taariikhda la magacaabay;

1. Jaalle Cabdi Weli SHeekh Aaden — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Kisimaayo, marka laga bilaabo 8/3/1975;
2. L/Xidigle Daahir Sheekh Maxamad — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Gaalkacyo, marka laga bilaabo 18/3/1975
3. Jaalle Cabdullaahi Xaaji Xasan — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Qandala, marka laga bilaabo 18/3/1975;
4. Jaalle Xuseen Xaashi — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Caluula, marka laga bilaabo 18/3/1975;
5. L/Xidigle Axmed Yuusuf Cumar — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Marka, marka laga bilaabo 18/3/1975ka;
6. Jaalle Daawuud Cali Yaxya — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Garoowe, marka laga bilaabo 18/3/1975;
7. L/Xidigle Axmed Jaamac Cali — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Ceel - Buur, marka laga bilaabo 18/3/1975;
8. Jaalle Axmed Xaaji Xaashi — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Waajid, marka laga bilaabo 18/3/1975;

Qodobka 2aad

Dhaqan Gal

Xeerkan, wuxuu dhaqan gelayaa ka bilaabanta taariikhda magaabidda Saraakiisha, waana in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda

*(Jaalle S Gaas Jaamac Maxamad Qaalib)*
XOGHAYAHA
WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Tr. 27 MAG. 1975 L. 109.

**Dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Concessione e conseguente libera disponibilità) Jaalle XASAN NUUR CILMI - ku yaal Muqdisho - Xaafadda Hodan, kuna fadhiya mq.1.271.**

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxday 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 144 soona baxday 23kii Maajo 1961kii;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday AXMED ISMACIIL CISMAAN taariikhdu markay aheyd 13 Giugno 1960 kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho - Xaafadda Hodan kuna dhacaaya qaybta VII;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, lamb. 11 soona baxday 1da Novembre 1961, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 16508, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, Fadhigoodii 284aad taariikhduna aheyd 18/4/1962;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 3072 taas oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 16508 laguna aqoonsaday fadhigii 17°aad ee guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taarikhdu markay aheyd 30 majo 1974, kuna saabsaneed dhismo Guri;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 6189 ee 8 LUG. 1962, kuna soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in AXMED ISMACIIL CISMAAN uu bixiyay lacag dhan Shs. So. 635,50/ kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 1.271/ loona tiriyay AXMED ISMACIIL CISMAAN sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taarikhdeeduna aheyd 14 LUG. 1962;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Waaxda Dhismaha dhulka taarikhdeeduna aheyd 18/5/1975 taas oo caddeyneysa

in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar lamb. 3072 ee 6/4/1971 laguna haqiijiyay sida ay nayshaddu guriga waafaqsan tahay;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta) dagganaashada guriga ku dhisan Xamar Xaafadda Hodan laguna siiyay xaashada lamb. 754/ ee 23 Maarso 1975 oo Dowladda Hoose ee Xamar;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) lamb. 1401 Reb. taarikh. 1° Oktoobar 1962, lagu diiwaan geliyay geliyay Xamar 2/10/1962 al n· 625 Atti Pubblici Vol.12, oo ah caddeynta Notayada M. Mariano taas oo AXMED ISMACIIL CISMAAN ka gaday kuna wareejiyay HAAJI YUUSUF CIGAAL wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan dhismaha ku yaal cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 1.271;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) lamb. 155 Reb. taarikh 1964, lagu diiwaan geliyay Xamar 3/5/1964 1.313 Atti Pubblici Vol. 14 oo ah caddeynta Notaayada Cabdalla Xaaji Faarax taas oo XAAJI YUUSUF CIGAAL ka gaday kuna wareejiyay XASAN NUUR CILMI wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan dhismaha cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 1271;

ISAGA OO AQOONSAN In la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhismaha, ku yaal ah cadka dhulka Dowladda (Concessione e conseguente libera disponibilita') oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis, wuxuu soo saaraya;

## X E E R

Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay, loona aqoonsaday XASAN NUUR CILMI, dhul ku fadhiya mq. 1.271/ kuna yaal Muqdisho - Xaafadda Hodan;

Muqdisho, 27 MAG. 1975;

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 19
Muqdisho, 9 GIU· 1975.
*G Dhtxe Cabdillahi Warsame Nuur;*

XOGHAYAHA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
W.S· INJ. *Maxamad Xaaji Xawaadle*

# BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

**XEER MAXKAMADDA GOBLKA HARGEYSA**

**Tr. 22. MAG. 1975. L.113.**

**Abshir Diiriye Cismaan iyo Bankiga Ganacsiga Ummadda.**

A M A R

Labada magac ee kor qoran waxay hor keenen Maxkamadda sida hoos ku qoran, Abshir Diiriye Cismaan wuxuu Maxkamadda hor keenay arji u ka dalbanayo in Jeeg wareega ee lamb. yahay 26579 uu ku qoray magac Cabdillahi Geedi Rooble kuna tiilay lacag dhan So. Sh. 9.000/00 (Sagaalkun oo shillin) uu ka lumay, Markii Cabdillahi Geedi Rooble oo jeegga siya Baabuur u ku joogay Amxaaradu Rasaas ku furtay isla goobtiina u ku Geeriyooday Cabdillahi Geedi Rooble sidaas oo ay ka hor caddeeyeen Maxkamadda Degmadda ee Hargeysa. Abshir Diiriye iyo Cabdiraxman Sh. Cabdillahi Aadan, taarikhdu markay ahayd 12.7.1975. Maxkamadduna ka rumaysatay. Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta, Hargeysa isaguna Maxkamadda wuxuu keenay warqad L.4804 Taar. ahayd 21kii Juulay 1975 u ku cadeynayo in u lumay jeegga lamb. yahay 26579 kuna qoran Jaalle Cabdillahi Geedi Rooble lacagtiisuna tahay 9.000/00 (sagaal kun oo shillin), Ogeysiiyeena Laamahooda oo dhan si aan loo bixin lacagta Jeegaasi ku qoran.

Sidaas darteed Markii aan Arkay waxyaalaha kor ku qoran iyo Markii aan Arkay qod. 27 Xeerka lamb. yahay 2 soona baxay 9.9.65 iyo qod. lamb. yahay 69 ee isla Xeerkaas waxaa la Amraya;

1. In uusan socon karin jeegga lamb. kiisu yahay kan kor ku qoran.
2. In lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.
3. In lacagtaas ah So. Sh. 9.000 (sagaal kun) Bankigu siiyo Caruurta iyo dadka dhaxalka marxuumkii Cadbillahi Geeddi Iska leh 30 Casho ka dib markii lagu qoro Fafinta Rasmiga ah.

26kii Juulay 1975.

*(Xasan Xaaji Yuusuf)*

GUDDOOMIYAHA

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

# MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

## DEKRETO LAMB. 20/75

Xalwo Cabdi Qabille iyo Bankiga Gnacsiga Ummadda AMAR. Labada Magac ee kor ku qoran waxay hor keenen Maxkamadda sida hoos ku qoran, Xalwo Cabdi Qabille waxay Maxkamadda hor keentay Arji ay ku dalbaneyso in Jeegga wareegga ee Lamb. yahay 5.429 kuna taalo lacag dhan 1.000/= ka lumay, Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta, Hargeysa Isaguna Maxkamadda wuxuu keenay warqad Lamb. 4423 taar. 8/7/75 u ku cadaynayo in u luamay Jeegga Lamb. yahay kaas kor ku qoran, anay jojiyeen bixinta lacagta ku taalay jeegga. Sidaa darteed markii aan arkay waxyaalaha kor ku qoran iyo markii aan arkay qod.27 Xeerka Lamb. 2 soona baxay 9/6/75 iyo qod. Lamb. 69 oo isla Xeerk awaxa la Amrayaa.

1. In uusan socon karin Jeegga Lamb. yahay kan kor ku qoran.
2. In lagu qoro Faafinta Rasmiga ah.
3. In lacagtaas ah Sh. So. 1.000/= (kun) Bankigu siiyo Arjilaha magaciisu kor ku qoran yahay 30 Casho ka dib marka lagu qoro Faafin Rasmiga ah.

Luuliyo 15. 7 75.

**(Xasan Xaaji Yuusuf)**
Guddoomiyaha Maxkamadda
Gobolka Hargeysa

(113/Bis)